

Tilmaamaha nadaafadda jirka

si loo yareeyo caabuq qaadista is daba socota



Gacmahaaga si fiican u mayr ama u dhaq.

Gacmahaaga si joogto ah oo fiican ugu mayr saabuun.




Hindhisadaada ku qabo suxulkaaga

Hindhisadaada ku qabo suxulkaaga oo ka jeedso dadka kale.



Gacmahaaga ha taabsiin wajigaaga

Iska ilaali in aad gacmahaaga saarto wajigaaga.



Naabkinnada la tuuro

Isticmaal naabkinnada la tuuro, oo hal jeer oo keliya isticmaal.

Macluumaadka loogu talagalay dadka ka soo noqday

meelaha leh halista cudurka COVID-19

Shaqaalaha tagay meel halis leh 14kii maalmood ee ugu dambeeyey ee ay ka muuqdaan calaamadaha jirrada ama bukaanku waxaa lagula talinayaa in ay iska ilaaliyaan in ay xiriirka laga maarmi karo la yeeshaan dadka kale, haddiina ay suurogal tahay, in ay guriga joogaan.

Carruurta fasax u tagtay meel halis leh 14kii maalmood ee ugu dambeeyey waa in ay guriga joogaan haddii ay suurogal tahay mana habboona in loo diro xarumaha daryeelka maalintii haddii ay calamaado jirro qabaan iyo haddii kale. Sida uu sheegay Xafiiska Caafimaadka iyo Badbaadada Cuntada ee Gobolka (LGL), fadlan xasuusnow in ay dhici karto in carruurta qaaday fayruska coronavirus ay haddana faafin karaan xataa haddii aanay ka muuqanin calaamado cudur.